

MACLUUMAADKA BUKAAN JIIFKA

# Levetiracetam Actavis

Dawaynta qalalka

## ! Xog muhiim ah!

La xidhiidh dhakhtarkaaga, shaqaalaha farmasiigaaga ama kaalkaalisada ka hor qaadashada Levetiracetam Actavis haddii aad:

- aad leedahay wax calaamado ah oo dagaal ah, walbahaar iyo/ama fikrado naf qudha iska jaris ah
- dhibaato kaa haysato dhibaatooyinn kelyaha ah

La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad ogaato suuxdinta in ay noqonayso mid aad u halis ah (tusaale kordhka tirada) Wixii xog dheeraada ah, eeg xogta bukaan jiiifka warqada macluumaadka ee ku dhex jirta xidhmada.

## Sida loo isticmaalo Levetiracetam Actavis

Had iyo jeer u qaado Levetiracetam Actavis sida uu ku faro dhakhtarkaagu. Haddii aanad hubin, waa in aad raadisaa tallada dhakhtarkaaga ama shaqaalaha farmasiigaaga Daawaynta caadi ahaan waxay ku bilaabantaa dawo qaadasho aad u hoosaysa, taas oo markaa aayar aayar u korodha. Waxay qaadan kartaa muddo in la helo dawo qaadashada adiga kugu habboon. kiniinka waa in la wada qaataa dhammaantii isku wakhti(yo) maalinta ah. Levetiracetam Actavis waxaa lala qaadan karaa cunto ama cunto la'aanteed. Ku liq kiniinka Levetiracetam Actavis biyo ku filan (tisaale, koob biyo ah)

Had iyo jeer qaado dhammaan dawo qaadashada sida uu u qoro dhakhtarkaagu. Weligaa ha qaadan qayb ka mid ah kiniinka.

### Intee in leeg ayay daawayntu soconaysaa?

Dhakhtarkaagu waxa uu si wada jir ah adiga kuula go'aamiyaa ilaa inta daawayntaadu socon doonto. Waa muhiim in aanad joojin daawayntaada adigoo la xidhiidhin dhakhtarka Joojinta kediska ah ee daawaynta Levetiracetam Actavis waxay keeni kartaa korodhka tirada suuxdinta. Haddii, sabab kastaba, daawayntaadu jooqsatay, qadarka dawo qaadashada waa in loo yareeyaa si aayar aayar ah sida lagu sheegay dawo qorista aad ka hesho dhakhtarkaaga.

### Maxaan samaynayaa haddii aan qaatay in badan ooLevetiracetam Actavis?


Saamynta dawada oo aan wanaagsanayn oo suuragal



ah marka waxbaradan oo xad dhaaf ah laga qaato Levetiracetam Actavis waa hurdo, cadho, dagaalan iyo feejignanta oo yaraata. La xidhiidh dhakhtarkaaga hadduu aad qaadato kiniin ka badan intaad qaadan lahayd.

### Maxaan samayn doonaa haddii aan ilaabo in aan qaato dawadayda?

La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad seegtay mid ama labba dawo qaadasho. Ha qaadan labba dawo qaadasho si aad u magdhowdo kiniin la iloobay.



## PATIENT INFORMATION

# Levetiracetam Actavis

For treatment of epilepsy

## Waa maxay saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada ee aadka loo yaqaanaa?

Sida dhammaan daawaynta oo dhan, daawayntani waxa a sababi kartaa saamayn dawo oo aaw anaagsanayn, lakiin maaha dadkoo dhan ee qaadanaya ay si lama huraan ah u dhibi doonto. Saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn “aad loo yaqaan” oo waxay dhacaan in ka badan 1 qof ama 10 bukaanjiif waa ololka sanko iyo/ama hunguriga, lulada iyo madax xanuun. Qaar ka mid aha saamaynta aan wanaagsanayn ee dawada, sida lulada, daalka iyo dawakhaada, waxay noqon karaan qaar aad loo arko bilowga daawaynta ama marka dawo qaadashada la kordhiyo. Si kastaba ha ahaatee saamaynta dawada aa wanaagsanayn way yaraan doontaa wakhti ka dib.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saamaynta dawada ee aan wanaagsanayn waxaa laga heli karaa warqadda macluumaadka ee ku jirta xidhmada.

## Maqaadan karaa dawooyin kale?

Waxaa jira dhibaatooyin dhif ah oo isku darka Levetiracetam Actavis lagu daro dawo kale, laakiin xataa sidaas darteed wa kuu muhiim adiga si aad ugu wargeliso dhakhtarkaaga waxa ay tahay dawada aad qaadanaysaa Tan waxaa ka mid dawooyin la qaato iyagoon lagu qorin iyo daawaynta dabiiciga ah.

## Gaadhi ma kaxayn karaa?

Levetiracetam Actavis waxay xumayn kartaa kartidaada aad ku wado gaadhi ama kaga shaqayso qalabka ama mishiinada maxaayeelay dawadu waxay kaa dhigtaa mid luloonaya. Tani aad bay u suuragal tahay bilowga dawada ama ka dib kordhinta dawo qaadashada. Waa in aanad kaxayn gaadhiga ama aanad ku shaqayn mashiin ka inta aanad aqoon haddiikartidaada ay saamayso Si kastaba ha ahaatee, xusuuso marka aad suuxdinta leedahay, laguuma ogola in aad gaadhi kaxayso marka aad soo dhaaftay hal sano oo bbuuxa oo aan suuxdin lahayn.



## Ma cabbi karaa khamro?

Waxaa jira xayiraado gaar ah oo khuseeya qaadashada khamrada,, oo ka baxsan talada guud in laga feejignaado qaadashada khamro xad dhaaf ah, gaar ahaan haddii aad la xanuusanayso qalal.

## Uurka iyo naasnuujinta

Daraasaadka muhiimka ah may muujin wax saamayn ah ah oo ilmaha uurka ku jira ah, laakiin had iyo jeer raadi waanada dhakhtarkaaga, sidii saamaynta lmaha uurka ku jira meesha laga saari karo gebi ahaanba Haddii aad uuraysato, ha joojin daawaynta ugu horayn adigoo raadin talada dhakhtarkaaga.

Heerka Levetiracetam Actavis ee ku jirta dhiiga way isbeddeli kartaa muddada uurka, gaar ahaan dhammaadka uurka. Dhakhtarkaaga waxa uu u baahanyahay in uu qaado muunado dhiig oo caadi ah si uu u baadho heerka Levetiracetam Actavis sidaas darteed dawa qaadashadaada waa la beddeli karaa haddii ay lama huraan tahay.

Levetiracetam waxay soo raacdaa caanaha naaska, sidaas darteed kala hadal halisa iyo faa’iidada naas nuujinta dhakhtarkaaga.



.....

.....

.....

.....

